transforming age®

Culture of Excellence/ Dhaqanka Heer Sare©

Isku xirida dhibicyada hadafkeena & qiyamyadeena

Beddelidda aragtida ku aadan da'du ayaa udub dhexaad u ah wax kasta oo aan samayno.

Waxaanu Nahay Transforming Age.

Hadafkeenu waa inaanu ka dhisno jawi gabow oo guulaysta iyo xalal cimri-dherer aagga bulsho-dhaqaale, kaasi oo mudnaanta siinaya dadka waayeelka ah. Falsafaddeena One Customer waxay ujeedadeedu tahay inaan awood siino gabow guulaysta iyo inaan horumarino cimri-dherer caafimaad leh. Waxaanu ku horumarinaa hawlgalkeena shanteena qodob ee hawlgalka ee guryeynta, adeegyada bulshada, iskaashiyo, teknoolojiyadda, iyo samafalka. Xalalkeena midaysan ee qofka mudnaanta siiya waxay kula kulmaan dadka halkay joogaan waxayna taageeraan [dadka] inta ay nool yihiin oo dhan.

Astaanteenu waxay u taagan tahay hawlgalkan, iyadoo isku keenaysa shanteena qodob iyadoo One Customer-na uu yahay udub-dhexaadka wax kasta oo aanu qabano.



Himiladeenu waa inaan awood siino gabow guulaysta & inaan horumarino cimri-dherer caafimaad leh.

Waxaanu rumaysannahay in dadka waayeelka ah ay xoojiyaan bulshada, oo annaga iyo cidda aanu wada shaqyano waxaanu ka shaqaynaa inaanu ballaarinno wixii suurtogal ah iyadoo cimrigu sii kordhayo. Waxaanu hormuud u nahay sharaf, isku-xir, iyo ujeedo si markaa cimriga dheer uu u ahaado nolol sidii hore dhaanta. Annagoo u marayna adeegyadeena, bulshooyinka, iyo iskaashiyo, waxaanu abuurnaa xaalado dadka waayeelka ah ay ku baraaraan fayoqab, lahaansho, iyo farxad.

"Annagoo wadajirna, maadaama hal shabakad ay u adeegayso hal macmiil markiiba, **waxaanu ka caawinaa dadka inay samaystaan sanado macne leh**, kaliya ma aha sanado badan."

"**Wax ka beddelka fahamka laga haysto** da'du waa shaqadeena maalinlaha ah iyo ballanqaadkeena muddada dheer."

"Gabowgu ma aha dhibaato xal u baahan. **Waa isbeddel ay tahay in la xakameeyo.**"

– Torsten Hirche
Madaxwayne & CEO (Madaxa Fulinta)

5-teena Qodob eeHawlgal

Guriyeynta

Waxaanu bixinaa guryeyn taageerta badbaadada, raaxada, ujeedada, iyo isku-xirka–-abuurista bulshooyin dadka waayeelka ah ay ku gaboobi karaan iyagoo madaxbannaan oo bulshada ka tirsan.

Adeegyada Bulshada

Waxaanu ka caawinaa dadka waayeelka ah inay had iyo jeer madax bannaanaadaan oo ka qaybgal sameeyaan iyagoo daboolaya baahiyaha maalinlaha ah oo xoojinaya xiriiradaa bulsheed si ay u helaan caafimaad iyo adkaysi fiican.

Samafalka

Waxaanu ballaarinaa helitaanka oo yaraynaa sinnaan la'aanta annagoo maalgalina tabobar daryeele oo xooggan, khibrad deggane oo fiican, iyo bulshooyin adkaysi badan oo lagu dhex noolaan karo.

"Waxaan dooranaa inaan noqono awood saameyn wanaagsan ku yeelata shaqada iyo kooxdayada, inaan is taageerno, oo aan qabano shaqadayada ugu fiican maalin kasta iyo isdhexgal kasta."

Iskaashiga

Waxaanu la shaqaynaa saaxiibada aanu isku shaqada nahay si aanu u ballaarino khayraadka, u horumarino adeegyada, oo u bixino casriyeyn xoojinaysa tayada nolosha ee dadka waayeelka ah.

Tiknoolajiyada/Farsamada

Waxaanu daryeelka ka dhignaa mid khaas ah, la heli karo, oo waxtar leh annagoo u marayno teknoolojiyad taageerta badbaadada, madaxbannaanida, iyo daryeelid fiican.

Habdhaqanka Heerka Sare

Habdhaqanka waa isku jirka caqiidooyinka la wadaago, qiyamyada, caadooyinka, iyo dhaqamada tilmaamaya oo caawiya qeexida koox dad ah.

Heerka Sare waxay ka dhigan tahay ku dadaalida in la noqdo qofka dadka ugu fiican. Waxay sidoo kale ka dhigan tahay in la sameeyo horumar oo wax la barto muddo kadib si loo helo natiijooyin sidii hore ka wanaagsan.

"Marka aan macaamiisheena iyo degganayasheena **u abuureyno fursado aan xadidneyn** mid kasta oo naga mid ah wuxuu abuuraa fursado aan xadidneyn si uu saameyn ugu yeesho kooxdayada."

Muujinta ficilada, go'aamada, ama fikradaha kala duwan ee COE

Culture of Excellence (COE) waxay muujisaa hadafkeenna, qiyamkeenna iyo yoolalkeenna.

Mid kasta oo naga mid ah wuxuu gacan ka geystaa hadafkayaga iyo yoolalkayaga anagoo si heer sare ah u qabana hawlahayaga oo muujina qiyamyadayaga.

Qiyamyadayaga

Anagoo mahadho wanaagsan u abuurayna xubnaha kooxdayada iyo degganayaashayaga/macaamiishayada, waxaan haysanaa fursad aan ku noolaano qiyamyadayaga. Sida aan dadka u salaamno, sida aan u daryeelno oo aan kor ugu qaadno dadka noloshooda, sida aan u samayno waxa saxda ah — maalin kasta.

Daacadnimo/Hufnaan

- Waxaan u dhaqannaa si daacad ah oo waxaan samaynaa waxa saxda ah.
- Waxaan nahay dad u heelan shaqada oo run sheega.
- Waxaan ku dadaalnaa shaqada si aan u kasbano aaminaad una muujino inaan nahay kuwo la aamini karo.

Wadashaqeyn kooxeed

- Waanu wada shaqaynaa oo waanu is taageernaa.
- Waxaan qiimeyneynaa shaqada xubin kasta oo kooxda kamid ah.
- Waxaan muujinaa hogaan si aan ugu adeegno deganayaashayada iyo macaamiishayada.

Xushmad

- Waxaanu ixtiraamnaa oo aan aqbalnaa qiimaha qof walba.
- Waxaan aqoonsannahay oo aan qadarinaa kala duwanaanshaha kooxdayada, deganayaashayada, iyo macaamiisheena.

Bilic

- Waxaan naxariis, garab raaricin, iyo u damqasho, u muujinaa dhammaan dadka.
- Waxaan xusnaa oo aan aqbalnaa kala duwanaanshaha dadka oo dhan.
- Waxaan daryeelnaa kooxdayada iyo dadka aan u adeegno.

Madadaalo

- Waxaan sameynaa madadaalo.
- Waxaan farxad gelinaa shaqadayada, kooxdayada, deganayaashayada, iyo macaamiishayada.
- Waxaan ognahay in dabeecadda wanaagsan ay gacan ka geysato heerka sare ee waxqabadka.

Hal-abuur

- Waxaan aqoonsanaa fursadaha aan horumar ku gaari karno maalin kasta.
- Waxaan wadaagnaa fikrado si aan u wanaajino sida aan u shaqeyno.
- Waxaan ka wada shaqaynaa in aan abuurno xalal cusub.

Is-xisaabin

- Waxaan qaadnaa mas'uuliyadda ficiladayada.
- Waxaanu ogeysiinaa kormeerahayaga haddii aanu khalad galno, si markaa si degdeg ah loogu xalliyo khaladka.
- Waxaan joogteynaa heerar/miqyaasyo sare.

Yoolalkayaga Istiraatiijiyadeed

Maalin kasta, shaqada aan dhammaanteen qabano waxay muhiim u tahay horumarinta hawlgalkeena iyo yoolasheena istaraatijiyadeed.

- **Noqo hoggaamiyaha u fiican gabowga guulaysta iyo cimri-dhererka** annagoo ku noolaanayna nidaamkeena Culture of Excellence maalin kasta.
- **Koritaan iyo casriyeyn** marka aanu dib u maalgalinayno barnaamijyada iyo mashaariicda si aanu u ballaarino saamaynteena.
- **Noqo qof qaas ah. Abuuritaanka xalal & adeegyo** farax galiya dadka, xoojiya khibradaha, oo quweeya hayaan gabow oo guulaysta–-iyagoo sii ahaanaya qaar raqiis ah oo la heli karo.
- **Noqoshada loo-shaqeeye la doorto iyo wax ku hoggaaminta tusaale** adigoo u maraya Dhaqan Hagaajineed, adigoo u dhigaya jaangoyno sare dadka, waxsoosaarka, iyo hannaano.
- **Noqoshada urur ku shaqeeya xog iyo aqoon** isagoo isticmaalaya natiijooyin iyo fahamyo si uu go'aano ugu qaato si dhakhso ah oo wax-ku-ool ah.
- **Badinta ahmiyadeena ugu weyn ee saddex goosoodka ah inta ugu badan.** Dadka, Macaashka iyo Deegaanka. Waxaanu ku waajahnaa dhibaatooyinka adag marka horeba waxtar dhanka shaqada ah iyo waaritaan bii'adeed, annagoo dib u maalgalinayna oo ballaarinayna guulaheena.

Fikradda ugu fiican ayaa guuleysata, ee ma aha jagada aad ku dhex leedahay ururka.

Hal Koox

Wakhtiga, dadaalka, tamarta iyo akhlaaqdeena ayaa qaabaysa Habdhaqankeena Heerka Sare. Maalin kasta, waxaad gacan ka gaysataa dhaqdhaqaaq lagu xoojinayo nafaf, ay hagayaan rumaysnaanteena hoggaamin adeege ah iyo ballanqaadkeena inaan ku shaqayno ujeedo iyo is-dhul-dhigid.



Habdhaqanka Heerka Sare oo Ficil ah

Hagaajin kaliya ma aha waxaynu u dadaalayno. Waa cidda aynu nahay. Maalin kasta, waxaanu bannaanka keenaa hawlgalkeena nolosha annagoo ku adeegayna naxariis, wax ku hoggaaminayna hufnaan, oo abuurayna bulshooyin iyo fursado badbaado ah, oo baraaraya. Si wadajir ah, waxaanu cabbirka dhignay meel sare waxaana ku dallacnay ruux togan oo "waan qaban karaa" ku taagan. Ficiladan ayaa na qeexa oo na dhiirigaliya si aanu u siino wax qabadkeena ugu fiican degganayaasha, macaamiisha, oo qofba kan kale usiiyo isla wax qabadka caynkaas ah.

Adeeg Heer Sare ah

Waxaan Samaynaa Raadraac Heer Sare ah:

- **Waxaan qof walba ula dhaqannaa** si naxariis, garab raaricin, iyo qaddarin leh–-had iyo jeer.
- **Si buuxda ayaanu u joognaa:** waxaanu salaanaa kuwa nagu xeeran waxaana siinaa dareenkeena oo dhammaystiran qofka hortayada jooga.
- **Waxaan dadka ula xiriirnaa** si xirfadi ku dheehan tahay oo soo dhawayn diirran leh macaamil kasta.
- **Waxaanu raacnaa** jaangoynada qurxinta iyo lebbiska si aanu u muujino heersarrayn.
- **Waxaanu ku koobnaa** aaladaha elektarooniga ah ee qofka u gaarka ah nasashooyinka oo ku ilaalinaa taleefanka gacanta isticmaalka ugu yar dadka kale agtooda.
- **Waxaan joogteynaa** in wada hadaladu noqdaan kuwo xirfad leh oo gaarsiisan heerka maqalka codka ku habboon.

Waxaan ku Shaqaynaa Caqliyadda Mulkiilenimo:

- **Waxaan qaadnaa masuuliyadda** si loo gaaro natiijooyin wacan loona qaato go'aano la awood siiyay.
- **Waxaan ku muujinaa** qiyamkeena xiise iyo ujeeddo waxa aanu qabanno oo dhan.
- **Waxaa naga go'an guulaysi** hawgalka, kooxdeena, iyo kuwa aanu u adeegno.

"Waxaan bartay in dadku ilaawi doonaan waxa aad tidhi, dadku waxay ilaawi doonaan waxa aad samaysay, laakiin dadku waligood ma ilaawi doonaan **sida aad dareensiisay.**"

- Maya Angelou

Waxaan Bixinaa Mahadho Heerkeedu Sarreeyo:

- **Waxaanu soo bandhignaa xalal** ku aaddan su'aalaha ama walaacyada–-marnaba cid kuma dhaafno jawaab la'aan.
- **Waxaan qofka weydiinaa,** "Ma jiraa wax kale oo aan kuu samayn karo?" kahor inta aanan dhammayn wada hadal kasta.
- **Waanu raacnaa macaamiisha iyo degganayaasha** marka la siinayo tilmaamaha ama waxaanu u helnaa cid sidaas u yeeli karta.
- **Waxaanu kaga jawaabnaa su'aalaha ama walaacyada** inaanu isticmaalno H.E.A.R. (Hear oo ah maqal, Empathize ama u damaq, Apologize oo ah ka raalli gali, Resolve ama xalli).

H **Maqlidda arrinta.** Si fiican u dhagaysi si aanu u hubino inaanu fahamnay.

E **U damqid.** **U muujinta inaanu fahamnay waxay ka hadlayaan iyo siday dareemayaan.**

"Dhoola cadeyntaada awgeed, waxaad **nolosha ka dhigtaa mid aad u qurux badan.**"

- Thich Nhat Hahn

A **Raaligali.** Arrinka iyo wixii dhib ah ee ka dhashay arrinkan ama laga yaabo inuu sababay.

R **Xali.** Sameynta wax walba si aan u xalinno arrinka ama aan u helno cid xallisa.

Hogaan Heer Sare ah

Waxaan Wax ku Hoggaaminaa Tusaale:

- **Dhammaanteen waxaanu nahay hoggaamiyayaal.** Waxaanu samaynaa wixii sax ah oo midkeenba kan kale yuu u adeegaa.
- **Waxaan nahay kuwa wax daneeyo oo si degdeg ah u falgalo.**
- **Waxaan aqbalnaa kala duwanaanshaha dhaqameed, kala-jaadnimada, sinnaan** iyo ka mid ahaanshaha.
- **Waxaanu taageernaa xubnaha kooxda** oo ka malaysanaa malaha ugu fiican.
- **Codka ayaanu sare u qaadnaa** marka la eego fursadaha dhanka horumarinta.
- **Waxaan ka qaybqaadanaa** helitaanka bii'ad shaqo oo togan oo caafimaad leh—-gaar ahaan marka cadaadis uu jiro.
- **Waxaan la xisaabtanaa nafteena** iyo dadka kale.
- **Waxaan hubinaa** fikradda u fiican inay guulaysato—-ee ma ahan darajo.
- **Marka go'aan la gaaro**, waxaanu u dhabar adeygnaa go'aanka oo horay ayaan u soconaa.
- **Waxaan u xallinaa khilaafka si degdeg ah** oo xirfadeysan.
- **Waxaan u soo dhawaynaa** xubnaha kooxda ee cusub si diirran oo loo dhan yahay.

Waxaan Helnaa Natiijooyin:

- **Waxaanu aqbalnaa mas'uuliyadda** falalka iyo natiijooyinkayaga.
- **Waxaan sameynaa intii karaankeena ah** waxaana leenahay hab-dhaqan ah inaanu qaban karno hawlaha ku saabsan.
- **Waxaan u qabanaa shaqadayada si sax ah oo dhamaystiran,** waxaana si buuxda u gudanaa masuuliyadaha kamidka ah shaqadayada.

- **Waxaanu keenaa** natiijooyin tayo sarreeya si loo helo saamaynta ugu badan.
- **Waxaanu ku soconaa ujeeddo** oo qaadnaa tallaabo bilaa wahsi.
- **Waxaanu saadaalinaa baahiyaha** oo tixgelinaa natiijooyin aan la filayn oo aad u badan.
- **Waxaan ku dadaalnaa tashiilidda dhaqaaleha** waxaana yareynaa kharashaadka baxaya. Ma nihin kuwa ku ciyaara dhaqaalaha.
- **Waxaanu ku dadaalnaa degganaansho maaliyadeed–-** bilaa macaash waa bilaa hawlgal. Cid kasta oo nala hawlgasha waxaa waajib ah inay maaliyad ahaan xooggan tahay si loo gaaro saamaynta hawlgalka ee la doonayo.
- **Waxaanu si joogto ah** u horumarinaa xirfadaha una samaynaa horumar maalinle ah.
- **Waxaanu u maaraynaa** kulamada si waxtar leh si aanu u badino inta ugu badan wakhtiga u adeegidda degganayaasha iyo macaamiisha.
- **Waxaanu ku ilaalinaa arrimaha** inay fududaadaan oo meel u jeedaan.

Waxaan Bixinaa Isgaarsiin ama Xiriir Wanaagsan:

- **Waxaanu aqoonsannaa** shaqooyinka sida wacan loo qabto oo ka mahadcelinaa.
- **Waanu daahfurannahay** oo waxaanu soo dhawaynaa wada-hadalka furan–-xataa marka khilaafi jiro.
- **Waxaanu xallinaa khilaafaadka** annagoo toos uga qaybgalina kuwa ku lugta leh.
- **Waxaanu dhawrnaa qarsoodiga** oo waxaanu isticmaalnaa garasho marka wax la qorayo ama dadka kale wax lala wadaagao.
- **Ma xamano**–-dadka waligayo.
- **Waxaanu ku hadalnaa cod xirfadlenimo** waxaana codkeena sare ugu qaadnaa kaliya badbaado darteed.

- **Waxaan farriimaha u gudbinaa si kooban** anagoo adeegsanayna 5-ta W iyo 1-ka H (Who (Cidda), What (Waxa), When (Goorma), Why (Sababta), Where (Goobta), iyo How (Sida)).
- **Waxaan kaga jawaabnaa farriimaha,** (iimeyl, fariimaha qoraalka, farriimaha codka) 24 saacadood gudahood, mar kasta oo ay suurtagal tahay.

Badbaado & Hoggaansamid Heer Sare ah

Waxaanu Sare u Qaadnaa Badbaado Heer Sare ah:

- **Waxaanu soo sheegnaa oo xallinaa** xaaladaha ama afcaasha khatarta ah isla markiiba si loo ilaaliyo cid kasta.
- **Waxaanu nahay qaar aqoon u leh** qalabka badbaadada kana caawiya degganayaasha iyo macaamiisha isticmaalkiisa saxda ah.
- **Waxaanu xasuusinaa** dadka kale habraacyada badbaadada oo si firfircoon uga qaybqaadanaa carbisyada iyo tabobarrada.
- **Waxaanu raacnaa tilmaamaha oo dhan** marka la eego nidaamyada kombiyuutarada shaqada, iyo aaladaha si aanu u joogtayno ammaanka iyo sidoo kale carbisyada iyo tabobarrada badbaadada.

Waxaan u Abuurnaa Bii'ad Badbaado leh Cid Kasta:

- **Waxaan ku dadaalnaa inaanu ka war hayno** waxa deegaankayaga ka dhacaya had iyo jeer.
- **Waxaanu ku ilaalinaa** aagagga shaqada nidaam, nadiifin, iyo xirfadlenimo.
- **Waxaanu qaadnaa** oo tuurnaa qashinka isla markiiba.
- **Waxaanu ka warbixinaa** farnijarka/alaabada la dhigo guriga ama xafiisyada sida miisaska iyo kuraasta iwm, qasabadaha, ama qalabka jaba isla markiiba.

Waxaanu Hubinaa Hoggaansan:

- **Waxaanu ilaalinaa** qarsoodiga–-marnaba ma wadaagno macluumaadka degganaha, macmiilka, ganacsiga, xubinta kooxda bilaa oggolaansho.
- **Waanu naqaanaa** oo raacnaa shuruudaha hoggaansanka iyo sharciga ee dawrkeena.
- **Waxaan ka warbixinaa** falka laga shakisan yahay ee rabshadda, ku xadgudubka waayeelka, dayaca, dhibaataynta, xoog sheegashada, xatooyada, ama khiyaamada durba.
- **Waxaanu ka warbixinaa** falalka ama waxyaabaha shakiga abuuraya isla markiiba.
- **Waxaan isticmaalnaa** Khadka Tooska ah ee Hoggaansanka (1-800-275-9575), transformingage.org, ama QR code wixii ah walaacyo aanaan ku niyadsamayn inaanu u sheegno maamulka.

"Dadku ma daneeyaan waxa aad taqaan ilaa ay ogaadaan **qiyaasta aad iyaga daryeesho.**"

- Theodore Roosevelt

Muujinta ficilada, go'aamada, ama fikradaha kala duwan ee COE

Maadaama cid kasta qayb ay ka ciyaartohawlgalkeena u adeegidda dadka waayeelka ah, waxaanu kugu dhiirigelinaa inaad ka fekerto su'aalahan oo aad xiriiriso dhibcaha u dhexeeya hawlgalka, qiyamka iyo yoolasha.

- **Maxaad u taqaan Habdhaqanka?**
- **Maxaad u taqaan Heerka Sare?**
- **Sideed ugu xiri kartaa hadafkayaga iyo qiyamyadayaga?**
- **Waa maxay xigashooyinka kugu dhiirigeliya inaad muujiso dadaalkaaga ugu badan?**

Hadafka — Qiyamyada — Yoolalka

MAHADSANID

Waad ku mahadsan tahay adigu ku biirista qoyska Transforming Age, taageeridda hawlgalkeena iyo horumarinta nolosha dadka waayeelka ah. Waxaan jeclaan lahaa inaan ra'yigaaga maqalno. Waan soo dhawaynayaa fikradahaaga, ha weynaadaan ama ha yaraadaan, dhaleecayntaada ama jawaab-celintaada, kaliya iimayl iigu soo dir ideas@transformingage.org

Si wadajir ah ayaan u bedeli karnaa dunida!

Torsten Hirche

Madaxweynaha & Madaxa Fulinta

TransformingAge.org
425-559-6301
© 2026 Transforming Age
Caddadka 6.0 2026